

17 mai waa maalinta qaranka ee Norge, amma maalintii dhalashada Norge
Maxaynu u xusnaa maalinta
17.mai?

Muddo 400 oo sannadood ah ayay Norge ka mid ahayd waddanka Danmark. Waxaana xukumi jirey boqorka Danmark waxaana lagu dhaqi jirey dastuurka Danmark. Sannadku marka uu ahaa 1814 isbadal badan ayaa ka dhacay Europa. Isbadalkaa Europa awgeed ayay Norge go'aansatay 17.mai 1814 in ay qortaan dastuur iyaga u gaar ah oo ay dalkood ku xukumaan.



Dastuurka waxaa lagu qoray saaladda weyn ee guriga ummadda ee ku yaala dhismaha Eidsvollbygningen. Dastuurka waxaa curiyey 112 nin oo maalqabeen ah kuwaas oo shir isugu yimid magaalada Eidsvoll, Waxa ay isla meeshaas ku doorteen cidda boqor u noqonaysa Norge. Waxa ay doorteen amiir Christian Frederik oo uu dhalay boqorka Danmark in uu noqdo boqorka Norge.

Marka laga bilaabo 17. mai 1814 waxa ay noqotay maalinta qaranka ee Norge. Waa maalin si weyn loo xuso oo calanka Norge meelkast ka babanayo. Ardayda iyo shaqaalahuba waa fasax maalintaa.



Sawirkani wuxuu muujinayaa saaladdii guriga ay ku shireen 112 nin ee qoray dastuurka 17. mai 1814 iyo dhismihii ay ku taalay saaladdu ee Eidsvollbygningen

Dharka iida



Bilde: tv:Knud Knudsen [CC BY 2.0 (<https://creativecommons.org/licenses/by/2.0>)], th: Wikipedia, cc commons

Waxa Norge dhaqan u ah in maalintaa qaranka aad iyo aad laysu qurxiyo oo qofkastaa dharkiisa ugu quruxda badan soo xirto. In badan oo dadka ka mid ahi waxa ay soo xirtaan dharka hiddaha iyo dhaqanka ee Norge. Xidhashada dharka hiddaha iyo dhaqanku waxa ay bilaabmatay muddo ku siman illaa 100 sano ka hor. Waalidku waxa ay bilaabeen in ay caruurta u xiraan dharka dhaqanka iyo hidaha maalinta qaranka markuu sannadku ahaa 1905. Waxaana lag soo minguuriyay dharkii hidaha u ahaa beeralayda Norge sanadihii 1800.

17. mai tog



Ardayda dugsiyadda ayaa dariiqyada magaalooyinka soo mara iyaga oo ruxaya calanka Norge heeso wadaniyana qaadaya, waxa hor socda kooxa baanboyda oo durbaano iyo musiko u tumaya. In ka badan 140 sano ayay ardaydu ku heesayeen heesta qaranka ee "Ja, vi elsker dette landet". Heesta waxa miraheeda qoray qoraaga lagu magacaabo Bjørnstjerne Bjørnson markuu sannadku ahaa 1859. Afar sano ka dib markii heesta la qoray ayuu laxanka saaray Rikard Nordraak oo ay ilmaadeer ahaayeen qoraaga heesta. 17. mai waxa lagu dabaaldega dugsiyada hortoodaa, jardiinooyinka iyo suuqyadda halkaas oo qudbado lga jeediyo. 17. mai waxa kale oo Norge looga yaqaan maalinta caruurta halkaasi oo caruurto, waxaana la siiyaa jalaato, sharaab iyo macmacaan

Dabaaldega galinjabinta(Russeferingen)

Ardayda waddankan marka ay dhameeyaan dugsiya sare way dabaaldegaan iyaga oo xirta dhar gaar oo loogu talagalay soo afjaridda 13 sano oo ay dugsi dhiganayeen. Dharka ay xirtaan waxa ay ku qoraan salaamo ay isu dirayaan iyo .Ardaydani (Russen)Waxa ay dhigtaan xaflado badan bisha mai. Badankoodo waxa ay wataan gawaadhi basas ah oo ay muusiko dhaaq dheeri ka baxayo. Waxa kale oo ay ka shactaraystaan macalimiintooda iyaga oo qaar ka mid ihi salaada hore ay guryahooda ku garaacaan maalinta 17. mai. Meelo badan oo waddanka ka mid ah dariiqyada ayay maraan iyaga oo qoob ka caar samaynaya iyo waxyaabo xiiso leh morsomme sketsjer og danser.



Qoyska reer boqor

Boqorka Norge waxaa la yidhaahdaa Kong Harald, boqorka iyo qoyskiisu waxa ay salaam sharafeed ku qaataan balakoonaha qasriga boqortooyada ee Oslo 17. mai. Maalintani waa maalinta ay ugu mashquul badanyihiin qoyska reer boqor. Saacado badan ayay taagnaadaan balakoonaha qasriga iyaga oo gacanta u ruxayaa ardayda faraha badan ee calamada ruxaya. In ka badan 100 sanadood ayay qoyska reer boqor balakoonahaa salaam sharafeedda ku qaadanayeen 17. mai.



Maka jawaabi kartaa suaalahan?

Maalinta qaranka Norge
waa tuma:

Midhaha heesta qaranka
Norge waxaa qoray:

Halkeebaa lagu qoray
dastuurka Norge:

Sannadkee baa la qoray
dastuurka Norge:

Laxanka yaa saaray heesta
qaranka Norge:

Yaa gacmaha ka ruxa
balakoonaha qasriga:

Maalinta qaranka Norge
waxa la dhahaa:

17. mai waxa aanu
cunnaa:

Dhamaadka dugsiga sare
maxaa la dhaha
dabaaldega ardadu
samayso:

